



Talooyin la-siinayo waalidiinta

Waaliddintu waxay kaalin weyn ka qaataan taageeridda waxbarashada ardayda. Daraasaduhu waxay si joogto ah u muujiyaan in ardaydu si fiican wax uga bartaan dugsiga haddii waalidiintoodu ay ka qabqaataan waxbarashadooda. Uma baahnid inaad aqoon u leedahay Ingiriisiga si aad uga caawiso oo uga taageerto ilmahaaga dugsiga.

Caawinta ilmahayga si uu Ingiriisiga u barto

Ka waalid ahaan, waxaa si xoogan laguugu dhiirigelinayaan inaad ku taageerto ilmahaaga inuu barto Ingiriisiga adoo:

- wax ugu aqriya ilmahaaga si joogto ah luqadda guriga iyo/ama Ingiriisi
- ku-dhiirigeliya ilmahaaga inuu horumariyo oo wado adeegsiga firfircooni ee luqadda gurigaaga
- la socda the [Manhajka Australia](#) iyo waxa ilmahaaga laga filayo inuu ku barto dugsiga
- ka-qaybgeliya ilmahaaga inuu ka hadlo wax ku saabsan waayo-aragnimadooda dugsiga
- la-hadlidda baraha ilmahaaga ama xubinta shaqaalaha ee ku habboon mar kasta oo aad su'aalo ama dareeno ka qabto ku saabsan barnamijka waxbarashada ama horumarka ilmahaaga
- imaanshaha wareysiyada waalidka iyo baraha

Markaad soo booqanayo dugsiga ilmahaaga, waxaad samaysan kartaa ballan si aad ula hadasho bareyaasha adoo la soo xciriira xafiiska hore ee dugsiga. Haddii uusan Ingiriisigu ahayn luqaddaada kowaad Aadna ku faraxsan tahay inaad adeegsato ku-hadlidda luqaddaada, waxaad weydiisan kartaa xubin qoyska ah ama saaxiib inuu kuu raaco dugsiga uuna kugu caawiyo inaad la hadasho shaqaalaha dugsiga. Sidaas baddelkeeda, waxaad dugsiga weydiisan kartaa turjumaan ayadoo loo maraypo [Adeega Fasiraadda iyo Turjumidda](#). Adeegaas waxaa loo bixiyaa si lacag la'aan ah.

Adeegisga luqaddaada

Ka waalid ahaan, waxaa muhiim kuu ah inaad sii waddo adeegisga luqadda guriga ee qoyskaaga.

Luqadda kowaad ama lahjadda ee ilmahaaga waxay si dhow ugu xiran tahay aqoonsigooda. Ku-dhiirigelinta horumarinta joogtada ah ee luqadda kowaad ee ilmahaaga waxay fududaysaa kala-guurka bulshadeed ama caadifadeed kaas oo dhaca markay u-wareegaan beya'd waxbarasho oo cusub.

Sii-wadida adeegsiga luqadda kowaad ee ilmahaaga waxay u ogolaanaysaa inay samaystaan aqoonta adduunka iyo eray-bixinta ku habboon da'da ayadoon aysan sugayn ilaa inta ay ka bartaan luqadda Ingiriisi ku filan si ay ugu mashquulaan mowduucyadan.

Waxaa jira qoraalo badan oo cilmi-baaristan ah taas oo uujinaysa in barteyaasha leh asaas xoogan ee luqaddooda iyo lahjadooda kowaad waxay u dhow yihiin inay u bartaan Ingiriisiga si dhaqso badan ayna gaaraan guul weyn xagga dugsiga. Waxaa adag in la dhiso luqad dheeraad ah haddii asaaska luqadda kowaad aan la samayn lana taageerin marka la baranayo luqad dheeraad ah. Samaynta iyo taageeridda asaaska ilmahaaga ee xagga luqadda gurigooda waxay lagama maarmaan u tahaysamaysanka guusha leh ee aqoonta iyo xirfadaha luqaddooda Ingiriisiga.

Ku-caawinta ilmahayga xagga dugsiga.

Haddii uu ilmahaagu uu weli baranayo inuu ku-hadlo, aqriyo uuna qoro Ingiriisiga, waxaa loo tixgeliya inuu Ingiriisigu yahay luqad ama lahjad dheeraad ah barteyaashana waxaa la siyyaa taageero dheeraad ah si looga caawiyo waxbarashadooda.

Dhammaan ardayda dugsiyada Australia waxay bartaan ujeeddada [Manhajka Australia](#).

Sababtoo ah ilmahaagu wuxuu baranayaa Ingiriisiga isla markii uu baranayo asaga/ayada baranayaan ujeeddooin cusub, howlaha waxbarashada waxaa lagu jaangooyaa si ay daboosho heerkooda aqoontooda Ingiriisiga. Markii ay Ingiriisi dheeraad ah sii bartaanba, noocyada taageerada ay heli doonaan way isbaddelaysaa.

Shaqo-guriga

Dugsi kastaa wuxuu leeyahayqorshaha shaqo-gurigooda. Shaqo-gurigu waxay ardayda siisaas fursadaha ay ku xoojinayaan waxbarashada fasalkooda, u-yeelanayaan caadooyinka waxbarasho oo fiican waxayna xubnaha qoyska ka-qaybgelisaa waxbrashadooda. Haddii ilmahaagu uusan fahmi karin shaqo-gurigooda, waa inaad kala hadashaa baraha fasalk wax ayada ku saabsan.

Ku-soo-aqinta buuggagta guriga si fan ah iyo raaxaysi ah waa nashaad shaqo-guri oo aad u wanaagsan. Wax baad u aqrin kartaa ilmahaaga, la aqrisan kartaa ilmahaaga, ama ayagaa iskood wax u aqrisan kara. Buuggagtu waxay noqon karaan ku Ingiriisi ah ama kuwo luqadda gurigaaga ah waxaana laga soo amaahan karaa aygoo lacag la'aan ah maktabadda dugsiga ama maktabadda dowladda hoose ee degaanka.

